Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Daa'uud Wiilkii Idejireha Ahaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson


Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Wkhati sii horreeyey, maalmihii Saa'uul Israa'iil boqrka u ahaa, waxaa jiray wiil magaciisa la odhan jiray Daa'uud oo caawin jiray toddoba ka mid ah walaalihii oo xoolaha raaci jiray. Inkasta oo ahaa kii caruurta ugu yaraa, Daa'uud xoog buu lahaa, wiil geesi ah oo jecel oo aaminsan Ilaah. Wuxuu ku noolaan jiray magaalada Beytalaxam.



Mar alla markii uu libaaxa soo weeraro idaha oo uu qabsado nayl yar si uu ugu casheeyo. Wiilkii yaraa ee Daa'uud wuxuu isna weerari jiray kan wax soo weeraray. Oo afkiisa ayuu kala soo bixi jira, oo intuu ku boodo ayuu gadhka ku dhago ayuu dili jiray. Daa'uud wuxuu garnayay inuu Ilaah caawiyo.



Samuu'eel, nabigii Ilaah, weli wuu ka xumaa in Saa'uul six un uga dhacay Ilaah. "War ilaa goormaad Saaa'uul u ooyeysaa" Ilaah wuxuu xaarxaadhay Samuu'eel. "Waxaan kuu dirayaa Yesay …, Waayo boqr baan wiilashiisa ka dhex doortay." Yesay wuxuu ahaa Daa'uud Aabbihii. Xitaa inkastoo uu Samuu'eel ogaa Boqor Saa'uul laga yaabo inuu dilo isaga si uu u helo boqr kale, nabigii wuu adeecay Ilaah.





Markii uu yimid
Samuu'eel, Yesay
toddobadiisii wiil buu
soo hor mariyey
Samuu'eel.  Oo
Samuu'eel Yesay wuxuu
ku yidhi, "Weli waxaa
hadhay Daa'uud."  Kii
ugu yaraa.  Oo iduhuu
ilaalinayaa, waxay
keeneen Daa'uud oo
Rabbigana wuxuu yidhi,
"Kac oo subag isaga,
waayo, kanu
waa isagii."

Qasrigii Saa'uul dhexdiisii, Ruuxii Rabbiga wuu ka dhex baxay Saa'uul oo wuxuu noqday nin dhibaateysa.




Adeegayaashiisii waxay is yidhaahdeen malaha maskaxdiisa waxaa dajin kara in loo garaaco miyuusik halaasan.

Mid ka mid ah wuxuu garanayay wiil dhalinyara ah oo si wanaagsan u tuma xargaha qalabka muusikada lagu tumo.


Miyaad qiyaas ahaan garan kartaa ninkaa dhalinyarada ah? Haa, Daa'uud.




Muusikadii Daa'uud way dejin jirtay Saa'uul oo wey ka caawin jirtay inuu si hagaagsan u fikiro. Saa'uul wuxuu weyddiistay Yesay inuu Daa'uud joogo oo ka mid noqdo adeegayaasha boqorka. Hadba kolkii Saa'uul uu isku buuqo ama cabsi ay soo wajahdo, Daa'uud baa u garaaci jiray muusikadiisa halaasiga ah ee xargaha lagu tumo. Weyna caawin jirtay.




Kadib markii Daa'uud uu aqalka aaday, Saa'uul waxaa soo wajahay dagaal weyn oo ay lala dagaalamayo reer Falastiin. Daa'uud walaalihii waxay ka qayb ka ahaaayeen ciidmadii Saa'uul. Yesay baa Daa'uud u diray jiidda hore ee dagaalka si uu cunto ugu geeyo walaalihii oo soo ogaado xaaladooda.




Cimlaaqi (Nin) aad u weyn oo ah Falastiini ah, Goli'at, oo ay ka cabsadeen ciidankii Israa'iil oo dhan.



"Nin iska soo doorta ii soo baxa aniga, oo ha soo dhaadhaxco!" Ayu Goli'at ku qayliyey. "Oo hadduu awoodo inuu i dilo, markaas waxaad noqoneynaa addoomadiina. Laakiin haddaan dilo isaga, markaa waxaad noo noqoneysaan addoomadeena." Raggii dhamaaq ree binu Israa'iil. Markii ay arkeen ninkan cimlaaqan weyn ah, wey ka carareen isagii, oo aad bay uga cabsadeen.




Dabadeed Daa'uud wuxuu ku yidhi Saa'uul, "Nina yyusan u cabsan; anoo addoonkaaga ah Ayaan u tagi doonaa oo la diriri doonaa midkan rer Falastiin ka ah." Saa'uul wuxuu doonay inuu u labiso dharkiisii askarta, seeftiinii ugu xidhay. Taas bedelkeedii Daa'uud iska qaatay ushiisii yareyd wuxuuna dhulka ka gurtay shan dhagxood oo ku ritay koleygiisii.



Goli'at wuu ku qoslay, markii uu arkay Daa'uudkan yar oo xitaa soo xidhan karin dharka dagaalka. "Hilibkaaga haaadka hawada iyo dugaaga duurka Ayaan siin doonaa!" ayuu ku dhawaaqay.


"Anigu se waxaan kuula imid magaca Rabbiga ciidamada!" ayuu Daa'uud ugu jawaabay. "Maanta Rabbiga gacanteyduu ii kaa soo galin doonaa … Waayo dagaalku waa kii Rabbiga."




Deedna Daa'uud wuxuu si toos ah ugu orday meeshuu joogay Goli'at. Wuxuuna ku riday hal dhagax oo uu kala soo baxay koleygiisii. Wajiga fooddiisa ayuuna kaga dhacay. Goli'at na gadaal-gadaal ayuu dhulka ugu dhacay!



Daa'uud durbadiiba seeftiisii weyneyd ee Goli'at ayuu ka soo saaray oo madaxa kaga jaray.  Markii ay arkeen Falastiiniyiintii Goli'at oo dhintay, naftoodii bay la careen.




Boqr Saa'uul ma uusan xasuusanayn inuu yahay Daa'uudkan kii u garaaci jiray muusikada kabanka ahayd.  Oo tilye wuxuu uga dhigay ciidamadii – deedna wuu ka hinaasay markii dadkii ay maamuuseen guushii Daa'uud. "Iminka maxaa intaas ka badan oo uu heli lahaa boqrtooyada mooyaane?"  Saa'uulm baa sidaa ku fikiray.  Oo Saa'uul maalintaas dabadeed Daa'uud si xun buu fiirin jiray.







Mar kale, Boqor Saa'uul maskaxdiisi wey isku buuqday. Oo Daa'uud baa u tumay muusikadii isagoo isku dayayo inuu dajiyo isaga.  Saddex jer buu Saa'uul waran ku tuuray Daa'uud, laakiin Daa'uud marwalbaba wuu ka baxaday.



Saa'uul wuxuu ka cabsaday Daa'uud, sababtoo ah wuu ogaa inuu Rabbigu la jiro isaga, laakiin wy ka maqnayd taasi Saa'uul qalbigiisa.



Laakiin Yoonataan wiilkii Saa'uul, wuxuu u jeclaa Daa'uud sidii walaalkii oo kale. "Aabbahay Saa'uul wuxuu doonayaa inuu ku dilo," ayuu uga digay Daa'uud. Deedna Daa'uud wuu baxsaday. Naagtiisii ayaa sanam dad u eg sariirtiiisii saartay, oo Daa'uud daaqadda ka dajisay habeen badhkii. Markii raggii Saa'uul aroortii yimaadeen, Daa'uud ma joogin.



Daa'uud wuu ka baxsaday Saa'uul. Intii uusan wax samayn, isaga iyo Yoonataan waxay wada galeen oo dhigteen axdi. Waxayna ku ballamaeen inay mar walba is caawiyaan midba midka kale.



Si muruge leh, bay labadii saaxiibo isu yihdahdeen nabadey oo kal tageen, Daa'uud wuxuu iska aaday meel uu ugu noolaan karo cabsi la'aan oo ciidanka Saa'uul ayna ka soo heli karin.




# Daa'uud Wiilkii Idejireha Ahaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

1 Samuu'eel 16 -20

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130


Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16